

Sharraxidda Qaybta Daryeelka Xoogan ee Qalliinka laabta



Qaybta Daryeelka Xoogan ee Qalliinka laabta

Waxannu sharraxaynaa qolka carruurta ee Qaybta Daryeelka Xoogan ee Qalliinka laabta iyo waxyaalaha aad halkan kala kulmi kartaan.

Marka hore waa filim, ka dibna waa faahfaahin ku saabsan qalabka/la socoshada aanu isticmaalno iyo warbixinno kale.



Shaqaalaha aad la kulmi doontaan

- Markaad joogtaan, kaalkaaliye caafimaad ayaa markasta ilmaha la socon doona.
- Dhakhtarka qalliinka ayaa ah masuulka bukaanka, qalliinka ka dibna wuxu idin sinayaa warbixin waxaanu idin la socon doona inta aad joogtaan.
- Islamarkaana koox aqoon kala duwan leh ayaa ka qaybgalaysa daawaynta, tusaale ahaan dhakhaatirta suuxinta iyo wadnaha, fiisiyoterabiste iyo shaqaalaha sawirka raajada.



Booska daryeelka xoogan ee caadiga ah



Shaashada la socoshada

Shaashadda la socoshada waxannu kala soconaa garaaca wadnaha, cadaadiska dhiiga, kulka jidhka iyo oksijiinta ku jirta dhiiga.



Mashiinka neefsashada

- Qalliinka ka dib waxa qofka lagu xidhay mashinka neefsashada oo tuubadiisa la sii marinayo sanko ama afka ka dibna la gelinayo sambabada.
- Wakhtiga mashiinka la isticmaalayo wuxu ku xidhan yahay xaaladda ilmaha, qaar waa saacado halka qaarna u baahan yihii maalmo.
- Mararka qaar waa in kaalkaaliyuhu tuubo dhuuban geliyo tuubada oo ka soo nuugo xabka.



Oksijiin la siinayo

Ka dib marka ilmaha laga furo mashiinka neefsashada, wuxu maalmaha hore u baahan karaa in lagu caawiyo oksijiin dheeraad ah ama in neefsashada laga caawiyo.

High-flow:



nCPAP:



Bamamka irbadaha

Bamamka irbaduhu waxay siinayaa daawooyin kala duwan oo markasta socda, tusaale ahaan xanuun baabiiye iyo daawooyinka maamula cadaadiska dhiiga.



Tuubo qoyaanka saarta

Qalliinka ka dib tuubo caag ah oo dhuuban ayaa ku jirta daloolka xabadka, taasoo soo saaraysa dhiiga iyo dheecaanka nabarka ee dheeraadka ah. Dhakhtarka qalliinka ayaa caadi ahaan tuubada saaraya maalinta qalliinka ku xigta.



Qasabad xidid

Tuubo caag ah oo dhuuban ayaa ku jirta xidid jidhka siiya dhiiga oo ku yaalla gacanta ama gumaarka. Waxa loo isticmaalaya in si joogto ah loo cabbiro cadaadiska dhiiga. Islamarkaana dhiig ayaa laga qaadi karaa halkaas, oo ma loo baahna in la muddo ilmaha.



CVK

Kateetar xidid oo dhexe, nooca loo yaqaano CVK, ayaa ku jira xidid dhiig oo weyn, waxaana halkaas laga siin karaa dawooyin. Dhiigna waa laga qaadi karaa halkaas.



Tuubo xidid

Tuubada xidid waa meelo xididka lagaga shubi karo dawooyin. Meelo kala duwan oo jidhka ah ayaa la gelin karaa, tusaale ahaan gacmaha iyo cagaha.



Pacemaker

Dadka qaar ayaa qalliinka ka dib la geliyaa fiiloyinka pacemakerka. Fiilooyinkaas waxa lagu xidhi karaa pacemaker ku meel gaadh ah. Fiilooyinka waxa caadi ahaan la saaraa 7-10 maalin ka dib xilliga qalliinka.



Tuubada cuntada

Ilmaha waxa caadi ahaan la gelinayaa tuubada caloosha oo sankaa ama afka la marinayo. Waxa loo isticmaalaya in dawooyin iyo cunto marka dambe ah lagu siiyo.



Kateetarka kaadida

Ilmaha waxa la gelinayaa kateetarka kaadida, ka dibna kaadidada inta la cabbiro ayaa lagu ururinayaa bac.

Kulaylka jidhka waxa laga cabbiri karaa kateetarka kaadida.



Elektoroodada EKG

Ilmaha jidhkiisa waxa ku dhegan elektoroodada EKG oo la socda garaaca wadnaha.



Cabbirka oksijiinta

Gacanta ama cagta ilmaha waxa ku dhegan cabbiraha oksijiinta dhiiga (pulsoksymeter).



Waxa kale oo ilmaha lagu xidhi karaa oksijiin cabbireyaal kale, tusaale ahaan lagu xidhi karo madaxa ama kellida.



Warbixin ku saabsan nidaamka

Waa tan warbixin faa'ido idiin lahaan karta. Markasta waa na weydiin kartaan su'aalaha aad qabtaan inta aad nala joogtaan.




Saacadaha u horreeya ee ku xiga qalliinka

- Dhakhtarka qalliinka ayaa ku soo wacaya marka qalliinku dhammaado
- Waxyaallo badan ayaa la qabanayaa marka lala socdo xaaladda ilmahiina, markaa wakhti ayay qaadan kartaa inaad u timaadaan oo aragtaan ilmaha
- Waxannu codsanayaa in booqashooyinka la soo gaabiyo wakhtiga u horreeya
- Xilligan ilmuhu inta badan wuu hurdaa, oo waxa muhiim ah inaan la toosin haddii aanay muhiim ahayn
- Dharka dibedda waa in la soo dhigo dibedda qolka bukaanka



Booqashooyinka

- Ilmahaaga waad soo booqan kartaa markaad rabto, marka shaqaaluhu is beddelayo mooyaane, waayo booqashooyin lama oggola xilligaas
- Subaxdii waxa jira hawlo badan oo ka kooban booqasho dhakhtar, qalab laga furayo, sawir raajo iyo baadhitaanno kale oo bukaan badan lagu samaynayo, markaa waxannu codsanaynaa in booqashooyinka laga dhigo ka dib sacaadda 10.00.
- Marka albaabka xarunta carruurta xidhan yahay, garaac albaabka ama la hadal shaqaalaha jooga dibedda xarunta si ay kuu caawiyaan.
- Waxa dhici karta in lagaa codsado inaad dibedda ku sugto marka baadhitaan lagu samaynayo ilmahaaga ama carruur kale. Waxa wacan inaan wakhti dheer la joogin daaradda qaybta. Waxa jira qolal loogu talagalay sugitaanka.
- Waxannu waalidka kula talinaynaa inay habeenkii seexdaan. Wakhti kasta waad na soo wici kartaa, waxaanad la hadli kartaa kaalkaaliyaha ilaalinaya ilmahaaga. Waanu idin la soo xidhiidhi doonaa haddii la rabo inaad qaybta timaadaan.



THORAXKIRURGISK INTENSIV 1
HJERTE-LUNGE-KAR KLINIKKEN
RIKSHOSPITALET

Telefon base: 23 07 37 03

TELEFON NR PAS ROM:

Besøktider: 10.00-14.30,
15-30-22.00

Telefon sentralbord: 23 07 00 00
Besøksadresse: Sognsvannsveien 20
Postadresse: 0027 OSLO
www.oslo-universitetssykehus.no

Booqashooyinka

- Waxannu codsanaynaa in la yareeyo tirada dadka booqashada, in mudnaanta la siiyo waalidiinta/dadka ilmaha haya.
- Haddii walaaluhu soo booqanayaan ilmaha, waa in marka hore lagala sii balamo qaybta.
- Nidaamka booqashooyinku wuxu isu beddeli karaa si waafaqsan nidaamka ka hortagga isqaadsiinta cudurrada.
- Waa muhiim in la ilaaliyo nadaafadda meesha ilmuhu joogo, markaa waa in gacmaha la nadiifiyo ka dib marka moobeelka la isticmaalo ama wax la mid ah la sameeyo ka hor intaan la taaban ilmaha.



Habeenkii in la seexdo qaybta

**Qaybta daryeelka xoogan
waalidku lama seexan karaan
ilmaha, taas darteed waxa la
siinayaa qol ka mid ah meelaha
waalidku seexdaan ee cisbitaalku
leeyahay.**



Warqadaha cuntada

Qaybtu ma laha jiko (kushiin) u gaar ah, markaa waalidka waxa la siinayaa warqadaha cuntada ee lagu isticmaalo maqaaxida shaqaaalaha.

 Oslo universitetssykehus
Rikshospitalet

Rekvisisjon foreldremat

MIDDAG

Thoraxkirurgisk intensivenhet

Navn:

Rekvisisjonen gjelder for overstående person for ett måltid kjøpt ved personalkantinen RH – HF.

Rekvisisjonen dekker kostnader til måltid inntil fastsatt sum:

Middag: kr: 60,- sønd- og helligdag inntil kr: 70,-

(Kostnader til aviser, sjokolade og lignende, dekkes ikke av denne rekvisisjonen).

Kostnaden belastes Thoraxkirurgisk intensivenhet kostnadssted: **120101**.

Dato: Sign:.....
Sykepleier

Stempel:

Mahadsanid!



Waxa diyaariyay "Kooxda carruurta" ee Qaybta Daryeelka Xoogan ee Qalliinka laabta, oo taageero ka helay sanduuqa Lasseliten ee carruurta wadne-xanuun qabta